

COVID-19 Deeqda Gargaarka Ijaarka (Rent Relief Grants)

Wareega Labaad

Jawaabaha iyo Su'aallaha

Somali
Soomaali

RASMI

Waa maxay Rent Relief Grant?

Xukuumada Fiktooriya waxay asaastay caawimada ijaarka ee dadka ijaaranaya gurigooda. Xukuumada Fiktooriya waxay waday barnaamij dhamaaday horaantii 2021.

Kharajbixinta waxaa heli kara dadka reer Fiktooriya kuwaas oo lumiyey lacagtii soo gelaystay sababna ay u tahay safmarka coronavirus (COVID-19).

Dadka reer Fiktooriya ee dhibta ku qaba bixinta waxaa laga yaabaa inay xaq u leeyihiin lacag bixin gaaraysa ilaa \$1,500.

Yaa xaq yeellan kara Rent Relief Grant?

Si aad xaq ugu yeellato lacag bixinta waxaad u baahan doontaa inaad:

- Aqbasho hoos u dhigida ijaarka qolada guriga leh aadna bixiso Cadayn Sharci ah
- Aad helayso lacag asbuucle ah oo dhan \$1,208.85 (qof keli ahaana) ama \$1,813.46 (laba qof ahaan)
- Inaad ku siiso 30% dakhligaaga ijaar ahaan qofka guriga leh
- Inay kuu taal bangiga ugu yaraan \$2000.

Sidee u codsan karaa deeq?

Waxaad ka dalban kartaa Rent Relief Grant oo online ah <<https://rentrelief.covid19.dhhs.vic.gov.au/>>.

Deeqdaas maxaa loo isticmaali karaa?

Haddii deeqdaada la ogolaado, lacagta waxaa toos loogu dirayaa cidda gurigaaga leh deyn ahaan ijaarka lagugu leeyahay ama lacagbixinta heshiiska ijaarka mustaqbilka.

Xaggee ka heli karaa macluumaad intaas ka badan?

Macluumaadkii ugu dambeyey ee COVID-19 Rent Relief Grants, booqo <<https://www.housing.vic.gov.au/help-renting/rentrelief>>

Haddii aad u baahan tahay mutarjum kala xiriira macluumaadka kor ku yaalla wac (Adeega Afcelinta iyo Tarjumaada) Translating and Interpreting Service (TIS National) oo ah 131 450.

Waxaa ansixisay oo daabacday Xukuumada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Xukuumada Fiktooriya, Australiya, Department of Families, Fairness and Housing, Oktoobar 2021.